Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 6-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

## MAXAAN SAMEYN KARAA HADDII ILMAHAYGA LA XANNIBO AMA LA GOONIYEEYO?

### I. TALLAABADA KOOWAAD: DIB U-EEGIS KU SAMEE SIYAASADDA IYO DIIWAANADA

Hel nuqulka siyaasadda dugsigaaga ee ku saabsan xannibaada iyo gooniyeynta. Sharciga Ohio wuxuu u baahan yahay in degmooyinka dugsiyadu yeeshaan siyaasad. Hel nuqulka IEP-ga ilmahaaga si aad u aragto in IEP-ga uu u ogolanayo isticmaalka gooniyeynta ama xannibaada iyo in kale. Go'aami in dugsigu raacayo siyaasadda iyo IEP-ga iyo in kale.

**Talo:** Maaha fikrad wanaagsan in isticmaalka gooniyeynta ama xannibaada lagu ogolaado IEP-ga. Taa beddelkeeda, IEP-ga waa in ay ku jiraan farsamooyinka wanaagsan ee wax ka beddelka habdhaqanka. Haddii IEP-gu ogolaado isticmaalka gooniyeynta iyo xannibaada, codso kulanka IEP si meesha looga saaro. Ka codso dugsiga in taa beddelkeeda uu ku daro farsamooyinka wanaagsan ee beddelka habdhaqanka.

### II. TALLAABADA LABAAD: GO'AAMI IN DUGSIGAAGU RAACAYO SIYAASADDA IYO IN KALE

Sharciga Ohio wuxuu u baahan yahay in dugsiyadu ay lahaadaan siyaasado ku saabsan xannibaada iyo gooniyeynta. Ugu yaraan, siyaasaddu waxay u baahan tahay:

**In dadaal kasta lagu bixiyo kahortagga isticmaalka xannibaada iyo gooniyeynta;**

**Seexinta dhulka (iyadoo wejigu uu hoos jira) marnaba lama isticmaali karo;**

**Dugsiyadu waa inay adeegsadaan faragelinada habdhaqanka wanaagsan iyo taageero;**

Xannibaadda iyo gooniyeynta maaha inay dhacaan marka laga reebo marka ay jirto **khatar degdeg ah oo waxyeello u geysan karta badbaadada jirka**;

Mar kasta oo la isticmaalo xannibaada ama gooniyeynta **waa in la diiwaangeliyaa oo laga warbixiyaa.**

**Talo:** Siyaasaddu waa inay u hoggaansantaa xeerka Ohio ee gooniyeynta iyo xannibaada. **Eeg, Ohio Admin. Xeerka 3301-35-15,** Miqyaasyada hirgelinta taageerooyinka faragelinta habdhaqanka suuban iyo isticmaalka xannibaada iyo gooniyeynta.

# XAASHIDA 6-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

## MAXAAN SAMEYN KARAA HADDII ILMAHAYGA LA XANNIBO AMA LA GOONIYEEYO?

### III. TALLAABADA SADDEXAAD: CODSO KULANKA IEP SI WAX LOOGA QABTO WALAACYADA

Walaacyadaada ku saabsan isticmaalka xannibaada iyo gooniyeynta kaga hadal kulanka IEP. Kooxda IEP-ga waa in ay ka hadlaan sida farsamooyinka wanaagsan ee wax ka beddelka habdhaqanka loo hirgelin karo si looga hortago isticmaalka gooniyeynta iyo xannibaada. Codso qiimaynta habdhaqanka shaqaynaya (functional behavior assessment, FBA) haddii kooxdu aanay garanayn sababaha keenayo qaabka ilmahaagu u dhaqmayo.

> **Talo: Codso kulamada dib u-eegista ee IEP sanadka oo dhan si aad dib ugu eegto** in farsamooyinka habdhaqanka wanaagsan ay shaqeynayaan si looga hortago isticmaalka gooniyeynta iyo xannibaada.  Kuma xadidnid hal kulan oo IEP ah sanadkiiba.